

XAASHIDA XAQIIQADA EE HOOYOYINKA AAN GUURSAN
SU'AALO IYO JAWAABO KU-SAABSAN QIRASHADA AABBANIMADA

Somali translation - Fact Sheet for Unmarried Moms – Questions & Answers About Acknowledging Paternity

Foomka Oggolaanshaha Ku-salaysan ee Qirashada Aabbanimada (TN VAO P)

Waxaa hoos ku-qoran qaar ka mid ah fahanka khaldan ee ay waalidku ka-qabaan arrimaha ku-saabsan qirashada aabbanimada ...

Su'aal: “Haddii uu ilmahayga aabbihiis uusan foomkan saxeexin, miyaa la ii diidi doonaa caawimada dadweyaha?”

Jawaab: Shaqaalaha arrintaada qaabilsan (case worker) ayaa go'aamin doona habka ugu wanaagsan ee aad adiga iyo ilmahaaguba ku faa'iidi karaysaan.

Su'aal: “Maxaa dhacaya haddii aanan hubin in uu yahay ilmahayga aabbihiis?”

Jawaab: Haddii uu midkasta oo labadiina ka mid ahi uusan hubin, waa in aanad foomka VAO P saxeexin. Waxaad u la-xidhiidhi kartaan wakaaladda taageerada ilmaha ee dagaankaaga si aad u codsataan baadhitaanka aabbanimada.

Su'aal: “Waxaanu ognahay in uusan isagu ahayn aabbaha dhabta ah ee ilmaha, balse wuxuu si dhab ah u doonayaa in uu noqdo aabbaha ilmaha.”

Jawaab: Waxaa iyadu arrin wanaagsan rabitaanka uu muujiyey ee uu ku doonayo in uu ka-qayb-qaato nolosha ilmaha. Haseyeeshe, waxaa loo-baahanyahay in aad ogaatid in uu dukumentigani yahay mid sharciyeed oo dhaar lagu xaqiijinayo in uu yahay aabbaha dhabta ah iyo aabbaha sharciyeysan ee ilmaha. Haddii aabbaha dhabta ah ee ilmuhu uusan karayn ama doonayn in uu ilmaha xannaano iyo barbarian u sameeyo, waxaa jiri karaa fursado kale oo ay ka mid tahay korsashada ilmaha (adoption).

Su'aal: “Aniga iyo aabaha ilmuhuba waxaanu nahay carruur. Miyaanu saxeexi karnaa foomkan?”

Jawaab: Haa. Gobolka Tennessee haddii ay walidkiinu ama koriyayaashiinu ay oggolyihiin in ay foomka oggolaanshaha saxeexaan, goob-joogayaalna ka noqdaan, foomka waad saxeexi kartaan.

Su'aal: “Haddii aan foomkan saxeexo, miyuu aabuhu miyuu ilmaha iga qaadan karaa?”

Jawaab: Maya. Haddii uusan jirin go'aan maxkamadeed oo si ka-duwan sheegaya, sharciga Tennessee wuxuu dhigayaa in ay hooyadu tahay koriyaha sharciyaysan ee ilmaha. Haseyeeshe, saxeexidda foomka VAO P, waxay aabbaha siinaysaa xuquuq uu ku-bilaabo codsi sharciyeed oo ku-doonayo in ay maxkamaddu u xukunto in uu noqdo koriyaha ilmaha in uu ilmahiisa soo booqdo.

Su'aal: “Marka uu aabuhu foomkan saxeexo, dawladdu miyey ku amraysaa in uu ilmaha caawiyo?”

Jawaab: Saxeexidda foomkan VAO P isla-markaaba ma keenayso in uu aabuhu bixiyo lacag uu ilmaha ku caawinayo. Laakiin, haddii ay hooyadu helayso caawimaadda dadweynaha ee la soo-mariyo DHS ama haddii ay sidaasi mustaqbalka dhacdo, waxaa aabbaha laga dalban karaa in uu ilmaha caawiyo.

Su'aal: “Haddii aanan doonayn in uu aabuhu bixiyo lacag uu ilmaha ku-caawinayo, maxay tahay sababta qasabka ka dhigaysa in aynu foomka saxeexno?”

Jawaab: Qirashada aabbanimadu waxay leedahay faa'iidooyin badan oo dhaafsiisan caawinta ilmaha. Tusaale:

- Waxay ilmaha suurtagel uga dhigaysaa in uu aabbihiis/abaheed garto/garato
- Waxay aabbaha u suurtagelinaysaa in ilmahiisa caymiska ku daro
- Waxay ilmaha siinaysaa xuquuqda faa'iidooyinka la-xidhiidha khabiirnimada isyaanimo iyo kuwa dammaanada bulsheed
- Waxay aabbaha siinaysaa xuquuq uu ku codsado in uu ilmaha koriyo ama uu soo booqdo iyo in uu ka-qaybqaato nolosha ilmaha

Su'aal: “Maxaa dhacaya haddii uusan aabuhu joogin oo uusan markaa saxeexi karayn, isaga oo xabsi ku-jira ama ka-tirsan adeeg ciidan?”

Jawaab: Si aad u qabsatid ballan kale oo aad foomka VAO P ku-buuxisid waxaad la xidhiidhi kartaa waaxda caafimaadka ama xafiiska taageerada ilmaha ee dagaankaaga. Waxay leeyihiin hab geeddi socod oo u diyaarsan oo ay kugu caawin karaan.

Haddii aad qabto su'aalo kale oo la xiriira qirashada aabbanimada, taageerada carruurta, ama hubinta dhaxal-sidaha, fadlan la xiriir Mashruuca Qirashada Aabbanimada, oo numberkiisu yahay: 1-800-457-2165